



Golaha Siyaasadda ee Head Start Waa uu Kuu Baahan Yahay!

Waa ayo Golaha Siyaasaddu?

Golaha Siyaasaddu waa koox waalidiin ah oo ka kala socota sagaalkayaga xarumood, kuwaas oo ka wada shaqeeya hagitaanka Barnaamijkayaga Head Start.

Golaha Siyaasaddu maxaa uu qabtaa?

Waxa aanu ku shirnaa hal habeen bishiiba (onlayn ahaan inta lagu gudo jiro bandooga COVID-19 iyo Xarunta Sacajawea marka aanu si shakhsii ah u shirayno). Shirkiiba waxa aanu gacan ka geysanaa qaadashada go'aanada muhiimka ah ee ku saabsan barnaamij-dejinta, kharashka, iyo go'aanada shaqaalaysiinta ee Head Start.

Marka aanu si shakhsii ah u wada joogno, cashada iyo daryeelka ilmaha waxa badanaa bixiya shaqaalaha Head Start. Turjumaanadu waa diyaar haddii loo baahdo.

Sidoo kale waxa aanu ku metelnaa barnaamijka Head Start ee PPS shirarka gobolka iyo kuwa deegaanka, tababarada iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah.

Maxay tahay sababta ay tahay in aan uga qayb noqdo Golaha Siyaasadda?

Golaha siyaasaddu waa meel:

- Gacan lagaga geysanayo in uu horumaro barnaamijkeenu.
- Lagu baranayo wax ku saabsan sida aad u caawin karto ilmahaaga.
- Aad kula kulmayso dad cusub oo kula wadaaga walaacyadaada.
- Aad ku dhisayso kalsoonidaada adiga oo qaadanaya tababarka hogaaminta.
- Aad helayso madadaalo adiga oo qabanaya shaqo muhiim ah!